HÄRRYDA KOMMUN

# Sidaan baad u buuxinasaa foomka codsiga kaalmada masruufka

**Tilmaamaha adeegga elektorooniga ah ee kaalmada masruufka**
Adeeggan elektorooniga ah waxaad adiga ka diiwaangashan degmada Härryda ka codsan kartaa kaalmada masruufka (lacagta cayrta).

**Inta aadan bilaabin adeegga elektorooniga ah**
Waxay qaadanaysaa qiyaastii 20 daqiiqo in codsiga elektorooniga ah la gudbiyo. Waa muhiim in xogta dakhliga kusoo gala iyo kharashaadka kugu baxa kaa agdhow yihiin markii aad codsiga samaynasid oo aad ku qortid cadadka lacageed ee saxda ah. Haddii aad rabtid inaad codsiga sii wadid mar kale waxaad dooran kartaa inaad keydsatid codsiga. Haddii xogtaada shaqsiyeed sir tahay amnigaaga dartiis ma isticmaali kartid adeeggan elektorooniga ah.

**Codsi dhammaystiran**
Si aan u bilowno gudagalka codsigaaga waa in si dhammaystiran loo buuxiyo. Dhammaan meelaha/su´aalaha leh xiddig : * waa khasab in laga jawaabo si aad horay ugu sii socotid codsigaaga. Haddii aad hilmaantay inaad meel/su´aal buuxisid waxaa lagu siinayaa warbixin ku saabsan waxaad kusoo dhamaystiri kartid si aad horay ugu sii socotid codsigaaga.

**La codsade**
Reer ma leedahay, qof aad isku jinsi tihiin lammaane ma tihiin ama wada nooshihiin waxay taasi la micne tahay inay waajib tahay inaad is masruuftaan. Lammaanahaaga markaas wuu kula codsanayaa codsigaaga oo dhaqaalaha reerka waa la isku xisaabinayaa. Taasi waxay la micne tahay in sidoo kale loo baahan yahay inaad ku buuxisid xogta shaqsigaa ee qofka kula codsanaya, emailka, wuxuu qabto, dakhliga iyo xogaha kale. Qofka kula codsanaya waxaa sidoo kale looga baahan yahay inuu oggolaansho ku bixiyo aqoonsigiisa elektorooniga ah si aan u bilowno inaan codsiga gudagalno. Waa muhiim sidaas darteed inaad ku buuxisid emailka saxda ah ee qofka kula codsanaya si uu usoo oggolaado (ansixiyo) codsiga.

**Wada hadalka baaritaanka ee codsiga ugu horreeya**

Haddii aad codsanaysid kaalmada masruufka markii koowaad, waxaa loola jeedaa codsigii kugu horreeyay, waxaan kaa lasoo xiriiri doonnaa telefoonka si aan wada hadalka baaritaanka kuula yeelanno. Waa muhiim inaad ka jawaabtid markii aan kusoo wacno. Wada hadalka baaritaanka gudihiisa waxaa ka mid ah warbixin lagaa siinayo wixii dokumentiyo oo lagaga baahan yahay inaad soo gudbisid.

**Xogta dakhliga iyo kharashaadka**

Si codsigu u noqdo mid dhammaystiran waa inaad kusoo dartid waxyaalaha caddaynaya dakhligaaga iyo kharashaadkaaga. Waxaad sidoo kale u baahan kartaa inaad soo gudbisid wixii dokumentiyo kale ah oo caddaynaya macluumaadka aad noo sheegtay. Waxaad sidoo kale dokumentiyada kusoo gudbin kartaa qaababkaan soo socda midkood:

- Adeegga elektorooniga ah laga soo diro.
- Keentid dokumentiyada gundhigga ah xafiiska guriga degmada (Råda torg, Mölnlycke). Haddii aad gacanhaye leedahay, fadlan kusoo qor magaceeda buqshadda.
- Kusoo dir dokumentiyada gundhigga ah emailka ekonomisktbistand@harryda.se
- Kusoo dir dokumentiyada gundhigga ah ekonomisktbistand@harryda.se
- Kusoo dir dokumentiyada gundhigga ah emailka (haddii aad gacanhaye leedahay, fadlan kusoo qor magaca gacanhayaha buqshadda):

  Härryda kommun
  Socialtjänsten/ekonomiskt bistånd (ev. namn)
  435 80 Mölnlycke

Markii aan helno dokumentiyada gundhigga ah waxaan bilaabaynaa gudagalka codsigaaga.

**Sidee ku gelaysaa adeegga?**

Waxaad ka gelaysaa adeegga elektorooniga ah harryda.se, ”Omsorg och hjälp” iyo ”e-tjänster” hoostooda oo kombuyuutarkaaga, kombuyuutarka gacanta ama telefoonkaaga casriga ah ku jira.

Taabo batoonka ”Till e-tjänsten” si aad u tagtid adeegga elektorooniga meesha laga galo.

Si aad u isticmaashid adeegga elektorooniga waxaad u baahan tahay aqoonsi elektoroonig ah tusaale ahaan BankID ama BankID-ga telefoonka gacanta.

Si aad u heshid warbixin intaa dheer oo ku saabsan sida loo soo degsado oo loo isticmaalo BankID booqo: [www.bankid.com](http://www.bankid.com)

Waxaad hadda soo gashay adeegga elektorooniga ah si aad ugu buuxisid xogtaada.

## 1. Codsade

Xogtaada shaqsiga ah waxaa laga soo qaatay diiwaanka dadwaynaha oo horay baa loogu sii buuxiyay. Adigu wax kama beddeli kartid xogtaas. Haddii ay jiraan wax aan sax ahayn, la xiriir xarunta lala xiriiro ama gacanhayehaaga. Waxaad ku buuxinaysaa xogta ka maqan.

## 2. Codsiga




Waxaad dooranaysaa codsi cusub haddii aadan codsan kaalmo masruuf saddexdii bilood ee lasoo dhaafay. Haddii taas cagsigeeda aad leedahay gacanhaye oo aad codsatay kaalmo masruuf saddexdii bilood oo lasoo dhaafay gudahooda waxaad dooranaysaa dib u codsasho.

Haddii aadan ogayn midkii aad dooran lahayd codsi cusub ama dib u codsasho waxaad xarunta lala xiriiro ka wici kartaa: 031-724 62 00.

Haddii aad codsi cusub samaysid waxaan kaa lasoo xiriiri doonnaa telefoonka dhowr maalmood gudohood si baaritaan wada hadal ah lagu la yeesho. Waa muhiim inaad ka jawaabtid markii aan kusoo wacno, haddii kale waxaad halis ugu jirtaa diidmo lagugu siiyo codsigaaga.

Muddada hoosteeda waxaad ka dooranaysaa bisha aad codsanaysid. Codsiga adeegga elektorooniga ah laga sameeyo waxaad codsan kartaa bisha lagu jiro keliya.

La codsade hoosteeda waxaad ku buuxinaysaa haddii aad leedahay oday/ xaas, lammaane ama aad wada nooshihiin.

### 3. Ilmo

Haddii reerku leeyahay ilmo 18 sano ka yar ama aad leedahay ilmo dugsi sare dhigta waxaad ku buuxinaysaa ilmaha xogtooda shaqsiyeed. Waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad ku buuxisid haddii ilmuhu si joogta ah kuula deggan yahay, marba waalid la deggan yahay ama haddii aad la kul kulantid ilmahaaga. Haddii aad leedahay ilmo ka wayn 18 sano oo aan dhigan dugsi sare ama ilmo aydin wada degganayn, waxaa dooranaysaa ilmo ma jiraan.

### 4. Deegaan (guri)

Haddii aad codsanaysid markii ugu horraysay ama aad soo guurtay waa inaad kusoo dartid heshiiska guriga aad deggan tahay iyo kirada guriga bisha lagu jiro. Haddii kirada guriga lagugu kordhiyay waa inay warqadda kirada guriga ay ku caddahay kirada lagu kordhiyay.

Halkaan waxaad sidoo kale ku qoraysaa haddii xaaladaada deegaan isbeddesho ama haddii odaygaagu/xaaskaagu/qofka aad wada nooshihiin ama ilmahaagu qorshaynayaan inaad ku sugnaataan (asbuuc ka badan) degmo kale muddada codsigu quseeyo gudaheeda.

### 5. Waxqabad

Waxqabad (shaqo) hoostiisa waxaad dooranaysaa waxa ugu wayn ee aad qabatid, waxaad kala dooran kartaa dhowr doorasho. Haddii aad jirro ku qoran tahay waa khasab inaad soo gudbisid caddayn dhakhtar oo caddaynasa inaad jirro ku qoran tahay.

Haddii uu jiro qof kula codsanaya waxaad sidoo kale ku buuxinaysaa qofka kula codsanaya wuxuu qabto.

### 6. Lacago lagu siiyo

Uma baahnid inaad kusoo buuxisid lacagaha/ kaalmooyinka hadda aad ka heshid hey´adaha dawladda ee kale. Gacanhayuhu wuxuu xogtaada ka keensanayaa hey´daha dawladda.

## 7. Dakhliyada

Dakhli ahaan waxaa loo xisaabiyaa mushaar, lacagaha swish la iskugu soo diro ama lacagaha kale ee akoonka lagu shubo/bangiga lagu soo xawilo.

Waa muhiim inaad qortid cadadka saxda ah ee kusoo gala. Waxaad kusoo lifaaqasaa gundhigga (waraaqda) mushaarka iyo waraaqaha caddaynaya akoonka wixii lacag kusoo dhacay.

## 8. Hantida

Hantida hoosteeda waxaad ku buuxinaysaa haddii lacag bangiga kuu taal, gaadiid leedahay, guri ama hanti kale.

Haddii qof kula codsanayo ama ilmo waad ku buuxinaysaan haddii ay hanti leeyihiin.

## 9. Kharashaadka

Waa muhiim inaad sheegtid cadadka lacageed ee saxda ah.Waxaad kusoo daraysaa waraaqaha lacagta lagu soo dirsado iyo/ama rasiid caddaynaya kharashka jira. Waxaa loo baahan yahay inaad muujisid inaad bixisay kharashaadkii bishii hore, taasoo aad samayn kartid adigoo tusaale ahaan keenaya waraaqaha muujinaa akoonkaaga wixii kusoo dhacay.

Kharashka ballanta daryeelka caafimaadka ee laga maqnaado ama daawada kharashkeeda aan la kabin lama bixiyo, haddii aan la keenin caddayn dhakhtar oo baahidaas keentay.

Haddii uu jiro qof kula codsanaya waxaad sidoo kale ku buuxinaysaan xogta qofka kula codsanaya dakhligiisa, lacagaha usoo dhaca iyo kharashaadkiisa.

## 10. Wixii kale

Halkaan waxaad ku buuxinaysaa xogta akoonkaaga. Haddii aad dib u codsanaysid oo horay u reebtay xogtaada shaqsiyeed, waxaad dooranaysaa akoonkii bangi ee aad horay u qortay.

Haddii aad bangiga beddelatid waxaad u baahan tahay inaad kusoo dartid waraaqaha akoonka wixii kusoo dhacay laga arko iyo warqadda dhaqaalahaaga guud laga arki karo ee akoonkaaga cusub.

Si aan uga gaarno gudagalka codsigaaga lacagta kaalmada masruufka waxaa loo baahan yahay inaad ku buuxisid inaad oggolaatid waxyaalahan soo socda:

- Waxaan halkaan ka ballanqaadayaa in xogta codsigaan ku jirta iyo sidoo kale xogta aan soo gudbiyay dhammaystiran tahay, run tahay oo xaqiiqda ku salaysan tahay.
- Waxaan halkaan kugu wargelinayaa in Qaybta qaabilsan kaalmada masruufka xaq u leedahay, sida uu dhigayo sharciga adeegga bulshada inuu soo uruuriyo xog ka timid Qasnadda caymiska guud (Försäkringskassan), Xafiiska diiwaangelinta iyo canshuuraha (Skatteverket), Xafiiska shaqada (Arbetsförmedlingen), CSN, degmo kale ka timid iyo sidoo kale xogta diiwaanka guud ku jirta haddii loo baahdo si codsiga loo gudagalo.
- Waxaan ogsoonahay in haddii aan soo gudbiyo xog aan run ahayn inay keeni karto in la igu dacweeyo booliska oo la igu soo oogo dacwad ah in la iga shakisan yahay dambiga isdaba marin kaalmo dhaqaale .
- Waxaan ogsoonahay in haddii duruufahayga wax iska beddelaan ay khasab tahay inaan soo sheego.

## 11. Kusoo lifaaq dokumentiga

Boggaan waxaad ka arki kartaa dokumentiyada ay tahay inaad soo gudbisid si aad codsigaaga usoo dhamaystirtid. Dokumentiyada waxaa loogu soo lifaaqi karaa afar qaab:

- Kombuyuutarka laga soo diro iyadoo loo marayo adeegga elektorooniga ah. Waa la duubi karaa dokumentiyada, la sawiri karaa ama lagu soo lifaaqi karaa fayl (tus. Pdf ama wax la mid ah).
- Kusoo dir dokumentiyada ekonomisktbistand@harryda.se
- Kusoo dir dokumentiyada email oo usoo dir (haddii aad leedahay gacanahaye, fadlan kusoo qor buqshadda magaca gacanhayaha):

  Härryda kommun
  Socialtjänsten/ekonomiskt bistånd (ev. namn)
  435 80 Mölnlycke

  Ama usoo gudbi dokumentiyada xafiiska guriga degmada (Råda torg, Mölnlycke). Haddii aad gacanhaye leedahay, fadlan kusoo qor magaciisa buqshadda.
- Haddii aad horay usoo gudbisay dokumentiyo quseeya xilligaan, waxaad dooranaysaa meesha ugu danbaysa oo ku qoraysaa sidaad kusoo gudbisay dokumentiyadaas.

## 12. Iska hubi

Boggaan waxaa ku jira xogtii aad ku buuxisay codsiga oo la isku soo uruuriyay:

- Isha mari xogta la isku uruuriyay oo arag inay sax tahay.
- Haddii aad rabtid inaad wax ka beddeshid dooro batoonka “ändra” qayb kasta.
- Codsigu haddii uu dhammaystiran yahay waxaad taabanaysaa batoonka ”signera och skicka in”.

## 13. Saxiix oo usoo dir

Halkaan waxaad ku oggolaanaysaa (ansixinaysaa) codsiga adigoo adeegsanaya aqoonsigaaga elektorooniga ah.

Haddii qof kula codsanayo waxaa email loo dirayaa emailka aad noo reebtay oo loogu sheegayaa warbixin ku saabsan sida qofka kula codsanaya codsiga u ansixin karo iyadoo la adeegsanayo aqoonsiga elektorooniga ah. Codsiga waxaa xafiiska adeegga bulshada loo dirayaa markii adiga iyo qofka kula codsanaya aad aqoonsiga elektorooniga ah ku oggolaataan.

## Soo dirtay codsiga

Markii codsigaaga aad dirtid waxaad naga helaysaa farriin wadata kiis lambar. Waxaad ka geli kartaa “Mina sidor” ee ku jira www.harryda.se si aad u aragtid codsiga aad soo dirtay.

**Gudagalka codsiga**

Markii uu nasoo gaaro codsiga koowaad iyo dhammaan dokumentiyada lagaa dalbaday, haddii sidoo kale aad tagtay ballantii koowaad oo aad la kulantay gacanhaye kiiskaaga si degdeg ah baan u gudageli doonnaa. Go´aanka waxaa lagu soo dhigayaa boostada oo lagugu soo dirayaa cinwaanka aad ka dhiiwaangashan tahay. Haddii lacag lagu soo dirayo waxaa si dhakhso lagugu soo dirayaa markii go´aanka la gaaro kaddib. Haddii shan maalmood oo maalmo shaqo ah aadan kusoo gudbin dokumentiyada lagaga baahan yahay waxaa codsigaaga laga gaarayaa go´aan diidmo ah.

Markii aad dib usoo codsatid si dhammaystiran oo aad ka samaysid adeegga

elektorooniga ah wuxuu hadafkeenu yahay inaan go´aan ku gaarno shan maalmood gudahood. Go´aanka waxa lagu soo dhigayaa boostada oo lagugu soo dirayaa cinwaanka aad ka diiwaangashan tahay. Haddii codsiga aad dib usoo codsatay uu nasoo gaaro ugu danbayn 20:ka bisha waxaan haddii aan lacag kusoo dirayno heli doontaa 27:da bil kasta ama maalinta ugu horraysa oo shaqo ee ugu dhow 27:da bisha. Haddii uu nasoo gaaro codsigu wixii ka danbeeya 20:ka bisha waxaa la gudagelayaa oo haddii lacag lasoo dirayo lasoo dirayaa sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagal ah.

**Xogta laga la xiriiro**
Haddii aad su´aalo qabtid waxaan kugu soo dhawaynanaa inaad kala xiriirtid xarunta lala xiriiro: 031-724 62 00

Booqo adigoo mudan boggeena si aad u heshid warbixin intaa ka badan : www.harryda.se/omsorgochhjalp/ekonomiforsorjningsstod